

Dhiirigelinta iyo caawinaada qoysaska ee is diiwaangelinta Kindergartenka bilaabanaya Janaayo 19, 2016

Cunugaagu ma waxa noqonaya

5 jir → ?



Haddii ay sidaas tahay, **hada waa waqtigii aad ka diiwaangelin lahayd kindergartenka!**

Nel caawinaada 

isdiiwaangelinta. Soo booqo xafiiska iskuulka ama degmada deriskaaga.

Macluumaad iyo Qalabka

Ee kuwa la shaqeeya qoysaska iyo carruurta dhalinyarada

Maxay midani muhiim u tahay?

1. Iska diiwaangelinta hore ee kindergartenku waxay sameeyn doontaa iskuxirka lagu hubsanyo **qoysasku inay helaan macluumaadka muhiimka** iyo ka caawin doonta inay iskuuladu u diyaargarobaan carruurta soo geli doonta dayrta.
2. Is diiwaangelinta hore **waxay ka caawisa qoysasku sidii ay iskugu diyaarin lahaayeen iskuulka** iyagoo macluumaadka heli doona waqti hore; qado bilaasha ama raqiis ah; gaadiidka basaska, daryeelka carruurta, iyo saacadaha iskuulka.
3. Bilaabida kindergartenku waa arin xiise iyo dareen fiican siinaysa waalidiinta iyo caruurtooda. Iskuulo badan ayaa qabta **xafaldo, barnaamij kala wareejina, iyo siiya fursado kale oo ay carruurta iyo waalidkood ay kula kulmaan shaqaalaha iskuulka iyo saaxiibadood kahor inta aanu iskuulku bilaaban.** Is diiwaangelinta hore waxay hubsan doontaa in ay waalidiintu helaan macluumaadka ku saabsan fursadaha iyo ku wareejinta sahlan.

Maxaan sameyn karaa?

Kala hadal qoysaska is diiwaangelinta kindergartenka. Haddii uu cunugoodu noqon doono 5 sanno jir kahor ama Agoosto 31, u sheeg inuu iskuulku bilaabay qabashada is diiwaangelinta Janaayo 19 iyo ku dhiirigeli inay iska diiwaangeliyaan sida ugu dhaqsaha badan, waxaana fiican sanadka dhamaadkiisa kahor.

Ka caawi qoysaska sidii ay ku ogaan lahaayeen dugsi degmoodkood iyo iskuulada deriskooda adigoo isticmaalaya macluumaadka ku yaal bogga labaad ee waraaqdaan ama adigoo soo wacaya Qadka Caafimaadka Qoyska ee 1-800-322-2588.

Caawinaada qoysaska ee isku diiwaangelinta waraaqaha. Si aay iskaga diiwaangeliyaan kindergartenka, qoysasku waxay keeni karaan ugu yaraan cadeeynta ciwaanka (lisenka baabuurta, heshiiska ijaarka, ama biilka tamarta) iyo waraaqda dhalashada cunuga iyo diiwaanka talaalka. Dugsi degmeedyada qaarkood waxaa laga yaaba inay doonayaan macluumaad dheeraad ah. **Ku dhiirigeli qoysaska inay ogaadaan iyo imaadaan is diiwaangelinta kindergartenka oo xafada wareejinta.**

Ee iskuulka deriskooda. Ma u malaynayaan qoysasku inay guuraan kahor bilaabida iskuulka? Ku Dhiirigeli inay hada is diiwaangeliyaan iyo ha u sheegaan iskuulka haddii ay guuraan.

Kala Xariirida Dagmada Is Diwaangelinta Kindergartenka

www.KRegNow.org

Booqo websideka degaanka ee is diiwaangelinta kindergartenka si aad u hesho qalabka qoysaska iyo bulshada oo ku qoran 13 luqadood oo kala duwan, xiriirada macluumaadka is diiwaangelinta degmada, iyo macluumaad kale oo muhiim ah.

Ma u baahan tahay caawinaad ah aqoonsiga dugsi degmeedkaada? Soo wac Qadka Caafimaadka Qoyska:

Wac 1-800-322-2588

Qariirada Wadooyinka Gobolka ee Degmo Dugsiyeedka

DEGMO DUGSIYEEDKA AUBURN

Xafiiska Degmada:

915 4th Street NE
Auburn, WA 98002

Lambarka Telefoonka: 253-931-4900

DUGSIYADA DADWEYNAHA FEDERAL WAY

Xafiiska Degmada:

Xarunta Adeegyada Waxbarashada (ESC)
33330 8th Avenue South
Federal Way, WA, 98003

Lambarka Telefoonka: 253-945-2000

DUGSIYADA DADWEYNAHA HIGHLINE

Xafiiska Degmada:

15675 Ambaum Blvd. SW
Burien, WA 98166

Lambarka Telefoonka: 206-631-3003

DEGMO DUGSIYEEDKA KENT

Xafiiska Degmada:

12033 SE 256th St
Kent, WA 98030-6503

Lambarka Telefoonka: 253-373-7235

DEGMO DUGSIYEEDKA RENTON

Xafiiska Degmada:

300 SW 7th Street
Renton, WA 98057

Lambarka Telefoonka: 425-204-2300

DUGSIYADA DADWEYNAHA SEATTLE

Xafiiska Degmada:

2445 3rd Ave. S
Seattle, WA 98134


Lambarka Telefoonka: 206-525-0760

DEGMO DUGSIYEEDKA TUKWILA

Xafiiska Degmada:

4640 S 144th St.
Tukwila, WA 98168

Lambarka Telefoonka: 206-901-8000



RACE to the TOP